

JAMHUURIYADDA
SOMALILAND



REPUBLIC OF
SOMALILAND

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
SOLICITOR GENERAL OFFICE

FAAFINTA RASMIGA AH OFFICIAL GAZETTE

النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند

Sananadka 10aad

Cadad Gaar ah

03/04/2021

FAAFINTA RASMIGA AH EE
SADDEX BILOOD-LAHA AH
JANUARY TO MARCH 2021

Email: garyaqaankaguud@gmail.com

Web: www.garyaqaankaguud.com

*Lama iibin karo
Not for sale*

Sannadka 2021



TUSMADA CADADKA

QAYBTA KOWAAD: XEERARKA BAARLAMAANKA, HESHIISYADA CAALAMIGA AH IYO MIISAANI YADDA QARANKA:

1. Wax-ka beddelka iyo Kaabista Xeerka Maamuuska Madaxweynaha, Madaxweyne ku Xigeenka hore, Guddoomiyaha Golaha Guurtida, Guddoomiyaha Golaha Wakiilada ee Hore iyo Mudanayaasha Baarlamaanka, Xeer Lr. 62/2020 (**Cadad gaar ah**)
2. Xeerka Aaga Ganacsiga Cashuuraha ka-caagan, Xeer Lr. 93/2021(**Cadad gaar ah**)
3. Wax-ka beddelka iyo kaabista Xeerka La-dagaalanka Maandooriyaha, Xeer Lr. 21/2021(**Cadad gaar ah**)

QAYBTA LABAAD: XEER MADAXWEYNE:

- | | | |
|-----|--|---------|
| 4. | <u>Xeer Madaxweyne</u>
Magacaabid | 3 |
| 5. | <u>Wareegto Madaxweyne</u>
Aas-aaska Mac'hadka Cilmi-
baadhista Beeraha | 5
12 |
| 6. | <u>Xeer Madaxweyne</u>
Dhismaha Guddida Tacliinta Sare | 23 |
| 7. | <u>Xeer Madaxweyne</u>
Magacaabid | 24 |
| 8. | <u>Xeer Madaxweyne</u>
Cayimaadda muddada Doorashada | 25 |
| 9. | <u>Xeer Madaxweyne</u>
Magacaabid | 26 |
| 10. | <u>Xil ka Qaadis</u> | 27 |
| 11. | <u>Xeer Madaxweyne</u>
Magacaabid | 27 |

QAYBTA SADEXAAD: XEER NIDAAMIYAYAASHA WASAARADAHA, XEERARKA GOLAYAASHA DEEGAANKA, NATIJOYINKA DOORASHOYINKA & BARNAAMIYADA DAWLADA:



12. SOOMA BIXIN

QAYBTA AFRAAD: GO'AANADA MAAMUL & QARAARADA:

13. SOOMA BIXIN

QAYBTA SHANAAD: AMARADA, OGEYSIISYADA & QANDARAASYADA DOWLADA:

14. SOOMA BIXIN



QAYBTA LABAAD:

XEER MADAXWEYNE:

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-621/012021

Taar: 10/01/2021

Wareegto Madaxweyne

Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda
Soomaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Arkay: Xeerhoosaadka Jaamacadda
Hargeysa;

Markaantixgeliyey: Muhimadda Dhismaha Guddida Sare
ee Jaamacadda ee Hargeysa u
leedahay Haykalka Maamul yo
Horumaka Jaamacadda Hargeysa;

Markaan Arkay: Aqoontooda, kartidooda iyo waaya arag
nimadooda;

Markaan ku qancay: In ay hanan kaRan masuuliyadda
ka dhalanaysa xilkan;

Waxaan Go'aamiyey;



In laga bilaabao taariikhda maanta aan u magacaabo xubnaha magacyadoodu hoos ku qoranyihiin in ay noqdaan Guddida Sare ee Jaamacadda Hargeysa:

Tir	Magaca	Xilka
1	Garyaqaaka guud ee Qaranka	Guddomiye
2	Agaasimaha fulinta Gaboodka haweenka Nagaad	Guddmiye Ku Xigeen
3	Maayarka Caasimadda Hargeysa	Xubin
4	Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka	xubin
5	Guddomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda	Xubin
6	Guddoomiyaha Rugta Ganacsiga	xubin
7	Agaasimaha Fulinta Akaadeemiga Nabadda iyo Horumarka (APD)	xubin

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XM/249-612/012021

Taar: 10/01/2021

Xeer Madaxweyne Lr. 10/012021

Aas-aaska Mac'hadka Cilmi-baadhista Beeraha

Markaan Arkay: Qodobka 90aad iyo Qodobka 113aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaaliland;

Markaan Arkay: Muhiimadda ay leeyihiin iyo kaalinta beerihu ay kaga jiraan dhaqaalaha dalka iyo gaadhitaanka isku-filaanshaha wax-soo -saarka dalaga beeraha;

Markaan Arkay: Baahida loo qabo Mac'hadka Cilmi-baadhista Beeraha oo ka masuul noqonaya cilmi- baadhista, daraassadda iyo kobcinta awoodda beeralayda dalka;

Markaan arkay: kaalinta iyo doorka uu mac'hadku ka qaadan karo kobcinta iyo dhiir-galinta wax-soo-saarka beeraha dalka iyo fidinta hababka casriga ah ee wax beerista;



Markaan tix-galiyay: Ahmiyadda weyn ee mac'hadkani u yeelankaro hirgalinta wax-soo-saarka beeraha oo ku salaysan aqoon iyo cilmi baadhis casri ah;

Markaan sameeyey: La-tashi;

Waxaan go'aamiyey;

Qodobka 1aad

Dhismaha mac'hadka Cilmi-baadhista Beeraha

- 1) Waxa halkan lagu aas-aasay mac'hadka Cilmi-baadhista Beeraha kaas oo noqonaya mac'had gaar ah oo qaabilsan cimi-baadhista iyo daraasaynta wax-soo-saarka beeraha dalka.
- 2) Mac'hadku waxa uu noqonayaa hay'ad Dawli ah oo madax-banaan, waxana uu yeelanayaa jiritaan qaanuuni ah iyo shaanbad ugaar ah, waxaana uu ku dacwayn karaa, laguna dacwayn karaa magaciisa, sidoo kalana ku qabanayaa hawlaha quseeya shaqadiisa.
- 3) Mac'hadku waxa uu hoos imanayaa (line ministry) Wasaarada Horumarinta Beeraha.

Qodobka 2aad

Ujeeddada Mac'hadka

Ujeeddada loo aas-aasay Mac'hadka Cilmi- baadhista Beerahu waa:

- 1) Inuu hormariyo wax-soo-saarka dalagyada beeraha, iyada oo la raacayo cilmi-baadhis.



- 2) In lagu dhiso qaab-dhismeed Dawli ah oo kobcya aqoonta beeralayda, isla markaana ku tababara beeralayda farsamooyinka falashada beeraha, iyadoo lagu salaynayo degaanada beer robaadka, beeraha waraabka iyo deegaanada u nugul abaaraha.
- 3) In uu sameeyo daraasado iyo cilmi-baadhis lagu curinayo tiknoolagiyad casri ah oo lagu horumarinayo beeraha, si kor loogu qaado wax-soo- saarka dalagyada beeraha loona gaadho isku filnaasho dhinaca cuntada ah.
- 4) In uu xidhiidhiyo isla markaana isku duwo hawlaha cilmi-baarista ee xarumaha cilmi-badhista iyo Jaamacadaha, sidoo kalana fuliyo najiidada cilmi-baadhista
- 5) In uu noqdo xarun cilmi-baadhiseed iyo maktabad ururisa mac'luumaadka guud ee la xidhiidha arrimaha beeraha.
- 6) In uu bixiyo adeegyada la- talinta ee dhinacyada cilmi-baadhista iyo tababarka beeraha.
- 7) In uu ku tababarshaqaalaha beeraha iyo beeralayda habka fidinta wax-soo-saarka dalagyada beeraha ee casriga ah.

Qodobka 3aad

Shaqooyinka Mac'hadka Cilmi-baadhista Beeraha

Shaqooyinka Mac'hadka cilmi baadhista waxa ka mid ah:

- 1) Diyaarinta siyaasadaha iyo istiraatiijiyada cilmi-baadhista beeraha, iyadoo la kaashanayo Wasaaradda Hormarinta Beeraha.
- 2) Diyaarinta qorshe hawleedka iyo barnaamijiyada cilmi-baadhista beeraha iyo hirgelintiisa.
- 3) Go'aaminta mudnaanta cilmi-baarista, iyada oo lagu salaynayo siyaasadaha dalka ee hormarinta beeraha



- 4) Qabashada cilmi-baadhista hormarinta wax-soo-saarka dalagyada beeraha, iyada oo lagu salaynayo siyaasada iyo istiraajiyadda cilmi-baadhista beeraha.
- 5) Abuurida xarumaha cilmi-baadhista beeraha ee gobollada iyo degmooyinka dalka, iyadoo loo eegaayo ku habaanaanshaha carrada iyo deegaanka.
- 6) KJa qayb qaadasha kor u qaadidda aqoonta iyo xirfada dadwaeynaha iyo gaaahaan beeralayda ee la xidhiidha hirgalinta natiijooyinka cilmi-baadhista iyo fidinta habka beer falashada.
- 7) Ururinta, habaynta iyo faafinta mac'luumaadka la xidhiidha hawlaha cilmi-baadhista beeraha ee dalka.
- 8) Ka talo-bixinta arimaha la xidhiidha cilmi-baadhista beeraha.
- 9) Kor u qaadida aqoonta beeralayda ee ka faa'iideysiga khayraadka biyaha iyo waraabka iyo habsami u isticmaalka biyaha.
- 10) Daraasaynta iyo qiimaynta saamaynta abaaruhu ku yeeshen wax-soo-saarka beeraha iyo soo-jeedinta xalkooda.

Qodobka 4aad

Qaab-dhismeedka Mac'hadka

Qaab-dhismeedka Mac'hadka cilmi-baadhista Beeruhu waxa uu ka kooban yahay:

- 1) Guddiga Sare ee Mac'hadka.
- 2) Agaasimaha Fulinta ee Mac'hadka.
- 3) Xarumaha Cilmi-baadhista, iyo
- 4) Waaxaha & Shaqaalaha kale ee lagama-maarmaanka u ah xil-gudashada Mac'hadka



Qodobka 5aad

Xubnaha Guddida Sare ee Mac'hadka

Guddida Saree e Mac'hadka waxa magacaabaya Madaxweynaha JSL, waxayna ka koobanyihiin 5 xubnood oo kala ah:

- 1) Wasiirka Wasaaradda Hormarinta Beeraha
= =Guddoomiye=
- 2) Agaasimaha waaxda Cilmi-baadhista ee
W/H/Beeraha =Xubin=
- 3) Hormoodka Kulliyada Beeraha ee Jamacadda
Hargeysa =Xubin=
- 4) Hormoodka Kulliyada Beeraha ee Jamacada Camuu d
=Xubin=
- 5) Hormoodka Kulliyada Beeraha ee Jamacada Burco
=Xubin=

Qodobka 6aad

Xilka iyo Waajibaadka Guddida

Xilka iyo Waajibaadka Guddida Sare ee Mac'hadka waxa ka mid ah

- 1) Diyaarinta siyaasaddaha lagu hagayo Mac'hadka ee ka turjumaya jihada uu u socdo Mac'hadku iyo sida loo hagayo,
- 2) Kormeeridda hawlaha shaqo iyo habsami u isticmaalka miisaaniyada Mac'hadka,
- 3) Ansixinta qaab-dhismeedka iyo Qorshaha Mac'hadka,
- 4) Xaqiijinta in mac'hadku u fuliyo hawshiisa shaqo si habsami ah,
- 5) Ansixinta aas-aasidda xarumaha cusub ee cilmi-baadhista, marka uu Agaasimuhu Fulintu soo gudbiyo.
- 6) Raadinta dhaqaale uu ku hawl-galo mac'hadku, iyo.
- 7) Fulinta hawlaha kale ee ku xusan xeerarka dalka ee khuseeya shaqadooda.



Qodobka 7aad

Shirarka Guddida

- 1) Gudduda Sare ee mac'hadku wuxuu yeelanayaa shirar caadi ah iyo aan caadi ahayn
- 2) Shirarka Guddida waxa guddoominaaya Guddomiyaha Guddida.
- 3) Shirarka Guddida waxay ku qabsoomayaan marka ay joogaan ugu yaraan afar xubnood, waxayna go'aamadooda ku ansixinayaan hal dheeri codadka xubnaha jooga.
- 4) Agaasimaha fulintu waxa uu noqonayaa Xoghayaha Guddida, wuxuu shirka ka dhiiban karaa ra'yi iyo talo, balse kuma laha cod.

Qodobka 8aad

Agaasimaha Fulinta Mac'hadka

- 1) Agaasimaha Fulinta Mac'hadka waxa magacaabaya isla markaana xilka ka qaadi kara Madaxweynaha JSL.
- 2) Agaasimaha Fulinta Mac'hadka waa in uu noqdo qof leh khibrad la xidhiidha ujeedooyinka loo aas-aasay Mac'hadka (maaraynta iyo cilmi-baadhistu).
- 3) Xilka iyo waajibaadka Agaasimaha Fulinta waxa ka mid ah:
 - a) Maamulka iyo socod-siinta hawl-maalmeedka shaqo ee Mac'hadka, isaga oo ku shaqaynaya siyaasadaha Qaranka ee Mac'hadka.
 - b) Metelaada iyo ku hadlidda Magaca Mac'hadka
 - c) Fulinta qorshayaasha iyo barnaamijyada shaqo ee Mac'hadka.
 - d) Diyaarinta qorshayaasha iyo barnaamijyada cilmi-baadhistu ee Mac'hadka.



- e) Hawl-galinta iyo kormeerka hawl-wadeenada iyo Shaqaalaha Mac'hadka, iyo xarumaha cilmi-baadhista,
- f) Magacaabidda shaqaalaha Mac'hadka, isaga oo u eegaya khibrada iyo aqoonta ay u leeyihiin booska loo magacaabay, si waafaqsan xeerka shaqaalaha Dawladda.
- g) Maamulka miisaaniyadda Mac'hadka, isagoo u raacaya xeerarka maaliyadda,
- h) Diyaarinta miisaniyadda iyo xisaab-xidhka Mac'hadka
- i) Diyaarinta War-bixinaha Mac'hadka.
- j) Dhaqan-galinta awaamirta iyo go'amada Guddida ka soo baxa
- k) Qaadista hadal-qooralka shirarka Guddida iyo kaydinta go'aammada Guddida.
- l) Xidhiidhinta Wasaaradda Horumarinta Beeraha iyo Mac'hadka.
- m) Qabashada shaqooyinka ee lagama-maarmaanka u ah xil-gudashada mac'hadka

Qodobka 9aad

Xarumaha Cilmi-baadhista

- 1) Xarunta cilmi-baadhista beeraha ee ABURIIN iyo dhulka ay ku taalo waxa yeelanaya mac'hadka.
- 2) Mac'hadka cilmi-baadhista Beeruhu waxa kale oo uu ku yeelan karaa xarumo cimi-badhiseed degmooyinka dalka, si uu fuliyo hawlihiisa la xidhiidha daraasaynta iyo cilmi-baadhista beeraha.



Qodobka 10aad

Xidhiidhka Wasaaradda Hormarinta Beeraha & Mac'hadka

- 1) Mac'hadka cilmi-baadhista beeruhu waxa uu u gudbinayaa siyaasadaha iyo istiraatiijiyada cilmi-baadhista beeraha ee uu diyaariyo Wasiirka Wasaaradda Hormarinta Beeraha, si uu u ansixiyo.
- 2) Wasiirku Wasaaradda Hormarinta Beeruhu waxa ka hawl-galayaa sidii mac'hadka loogu raadin lahaa dhaqaale uu ku fuliyo hawlihiisa shaqo.
- 3) Mac'hadku waxa uu wasaaradda u gudbinayaa war-bixinaha la xidhiidha wax-qabadkiisa.
- 4) Wasiirku waxa uu siin karaa Mac'hadka tilmaamo iyo talooyin la xidhiidha xil-gudashadiisa marka uu u arko lagama-maarmaan. Sidoo kale mac'hadku wuxu ku war-galinayaa wasiirka hawlaha uu u arko in ay ku jirto danta Qaranka ee la xidhiidha cilmi-baadhista beeraha dalka.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XM/249-611/012021

Taar: 10/01/2021



Xeer Madaxweyne Lr. 09/012021

Dhismaha Guddida Tacliinta Sare

Markaan Arkay: Qodobka 15aad, 90aad iyo 113aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobka 63 (3) ee Xeerka kala Xadaynta Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'adaha Madaxa Bannaan Xeer Lr. 71/2015 iyo Qodobka 28aad ee Xeerka Waxbarashada Qaranka Xeer Lr. 77/2018;

Markaan Arkay: Ahmiyadda ay leedahay in la helo Tacliinta Sare oo tayo leh oo soo saarta aqoon yahan ka qayb qaata horumarinta dhaqaalaha, siyaasadda, caddaaladda, arrimaha bulshada iyo dhismaha dawladnimada;

Markaan Dersay: Muhiimadda ay leedahay in qaranku yeesho hay'ad dawli ah oo u xilsaaran diiwaan-gelinta, ruqsad siinta, kormeerka iyo dabagalka goobaha tacliinta sare ee dalka, si loo helo waxbarasho sare oo tayo leh oo casri ah;

Markaan Sameeyey: La-tashi;

Waxaan Go'aamiyey;



Qodobka 1aad

Guddida Tacliinta Sare

- 1) Guddida Tacliinta Sare waa Hay'ad Dawli ah oo leh jiritaan qaanuuni ah, waxaana ay ka masuul noqonaysaa maamulka, maaraynta iyo ilaalinta tayada Tacliinta Sare, si waafaqsan qorshaha waxbarashada Qaranka.
- 2) Si ay gudato hawlaheeda shaqo. Guddida Tacliinta Sare waxa ay yeelanaysaa Qaab-dhismeed Hay'adeed oo madax-bannaan iyo miisaaniyad u gaar ah, waxaana uu hawlihiisa u gudanayaa si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka Dalka.
- 3) Guddida Tacliinta Sare waxay wadashaqayn dhaw kala yeelanaysaa Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska arrimaha la xidhiidha diyaarinta iyo hirgalinta siyaasadaha Tacliinta Sare
- 4) Wasiirku waxa uu siin karaa Guddida tilmaamo iyo talooyin la xidhiidha xil-gudashadiisa marka uu u arko lagama-maarmaan. sidoo kale Guddidu waxay ku wargalinaysaa Wasiirka hawlaha ay u arkaan inay ku jirto danta qaranka ee la xidhaadha tacliinta sare.

Qodobka 2aad

Ujeeddooyinka Dhismaha Guddida Tacliinta sare

Ujeeddooyinka loo as-aasay Guddida Tacliinta Sare waxa ka mida:

- 1) In la helo hay'ad dawli ah oo Qaranka uga Masuul noqota diwwan-galinta, maamulka iyo kormeerka iyo sidoo kale hubinta tayada xarumaha waxbarasha tacliinta sare ee dalka, si waafaqsan nidaamka waxbarashada Qaranka iyo Xeerka Tacliinta Sare.



- 2) In la dhiiri galiyo xarumaha Waxbarashada Tacliinta Sare, si loo helo xarumo bixiya aqoon dhiirigalis koboc dhaqaale, caddalad, xil-kasnimo iyo qiimaynta aayaha nabada
- 3) In la dajiyo siyaasado iyo qorshe hawleed lagu hormarinayo tacliinta sare si loo helo waxbarasho sare oo jaban oo lawada awoodi karo, loona daboolo baahida waxbarashada sare ee dalka.

Qodobka 3aad

Qaab-dhismeedka Guddida Tacliinta Sare

- 1) Guddida Tacliinta Sare waxay ka koobnaanaysaa 7 xubnood oo kala ah;
 - a) Guddoomiyaha Guddida,
 - b) Goddoo miye Ku-xigeenka Guddida,
 - c) Shan (5) xubnood oo kale.
 - d) Agaasime Guud iyo
 - e) Waaxaha & Shaqaalaha Kale ee lagama-maarka u ah xil-gudashada guddida.
- 2) Guddoomiyaha, Guddoo miye Ku-xigeenka, Xubnaha kale iyo Agaasime Guud ee Guddida Tacliinta Sare waxaa magcaabaya Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaaliland, si waafaqsan Qodobka 90aad ee Dastuurka.

Qodobka 4aad

Shaqada Guddida Tacliinta Sare

Shaqooyinka Guddida Tacliinta Sare waxa ka mida;

1. Diyaarinta siyaasadda iyo qorshaha Qaranka ee Tacliinta Sare ee xarumaha tacliinta sare ee Dawladda iyo xarumaha tacliinta sare ee gaarka loo



leeyahay, iyagoo la kaa shanaya Wasaaradda Waxbarashada, waxaana ansixinya Golaha Wasiirada.

2. Diyaarinta siyaasado qeexaya shuruudaha looga baahanyahay hirgalinta xarumaha tacliinta sare ee gaarka loo leeyahay, iyagoo la kashanaya Wasaaradda Waxbarashada
3. Diyaarinta iyo hirgalinta nidaamka hubinta tayada waxbarashada tacliinta sare ee la xidhiidha abuuridda Jaamacadaha, kulliyadaha, diiwangalintooda iyo nidaamaka dajinta manaahijta waxbarashada tacliinta sare, iyagoo lakaashanayaa Wasaaradda Waxbarashada.
4. Diyaarinta hab-raacyada iyo shuruudaha ay xarumaha tacliinta sare ku bixin karaan shahaadooyinka waxbarashada tacliinta sare, iyagoo la kaashanaya Wasaaradda Waxbarashada.
5. Diyaarinta hab-raacyo lagu cxaqiijinayo hannaanka maamul-wanaagga iyo qaab-dhismeedka maamulka ee tacliinta sare, si loo sugo heererka tayada ee xarumaha tacliinta saree e dalka, iyagoo la kaashanaya Wasaaradda Waxbarashada.
6. Ka talo siinta xukuumadda hirgalinta Jamacadaha Dawladda ka dib markay sameeyaan qiimaynta baahidaasi
7. Hirgalinta nidaam midaysan oo kor u qadaya Maamulka Jaamacadaha iyo Kulliyadaha bixiya waxbarasho ku salaysan barnaamij tacliinta sare
8. Bixinta ruqsadaha, cusboonaysiinta iyo kala noqoshada ruqsadaha xarumaha tacliinta sare ee gaar loo leeyahay
9. Ogolaanshaha iyo ansixinta codsiyada dhismaha iyo hirgalinta xarumaha tacliinta sare ee gaarka loo



leeyahay ee ay ka mid yihiin Jamacadaha iyo kulliyaduhu

10. Ogolaanshaha iyo ansixinta codsiyada lagu furanayo laamo iyo kulliyado ay gobollada dalka ka furanayaan xarumaha tacliinta saree e gaar loo leeyahay
11. Qiimaynta iyo ansixinta koorooyinka waxbarashada tacliinta sare ee ay u soo gudbiyaan xarumaha tacliinta saree e gaar loo leeyahay
12. Dib-u-habaynta iyo qiimaynta xarumaha waxbarashada tacliinta sare iyo barnaamijyada waxbarashada si ay uga jawaabaan baahiyahay iyo hormaka Jamhuuriyadda Somaliland
13. Xaqiijinta heerarka koorsooyinka waxbarashada iyo imtixaanada ee xarumaha tacliinta sare ee dalka
14. Diyaarinta qorsha Guddida ee kormeerka iyo dabagalka jaamacadaha gaarka loo leeyahay.
15. Dabagalka, kormeerka iyo qiimaynta xarumaha tacliinta sare ee gaarka loo leeyahay, si loo xaqiijiyo u hoggaasanaanta heerarka tayada iyo siyaasadaha waxbarashada tacliinta sare.
16. Dhiirgalinta xidhiidhka xarumaha tacliinta sare, si looga wada faa'daysto khibrada iyo aqoonta, loona wadaago cilmiga iyo iskaashiga.
17. Katalo siinta xukuumadda deeqaha kabka ee loo qoondaynayo Jaamacadaha dawlada, si ay u daboolaan bahiyahooda iyo qiimaynta kharashaadka dawladda
18. Qabashada shaqooyinka kale ee ku xusan xeerarka dalka.



Qodobka 5aad

Xilka iyo Waajibaadka Guddoomiyaha Guddida

Xilka iyo waajibaadka Guddomiya Guddida Tacliinta Sare waxa ka mida;

- 1) In uu socodsiiyo, isla markaana maamulo shaqooyinka uu u xil-saaranyahay ee Guddida.
- 2) In uu matalo, kuna hadlo magaca Guddida
- 3) In uu guddoomiyo shirarka Guddida Tacliinta Sare
- 4) In u soo jeediyo Miisaniyadda Guddida Tacliinta Sare, markuu kala tashado Agaasimaha Guud ee Guddida.
- 5) Inuu diyaariyo, isla markaana usoo bandhigo Xubnaha Gudida qorshayaasha iyo barnaamijyada shaqo ee Guddida Tacliinta Sare.
- 6) Inuu hay'ada shaqaalaha dawlada ka dalbado shaqaalaha, si waafaqan qorshaha Guddida Tacliinta Sare
- 7) Inuu diyaariyo war-bixinaha iyo xisaab-xidhada Guddida Tacliinta Sare, una gudbiyo hay'adaha ay khusayso iyo Madaxwaynaha.
- 8) Inuu saxeexo qoraallada rasmiga ah Guddida Tacliinta Sare
- 9) Inuu xidhiidhiyo Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska iyo Guddida Tacliinta Sare iyo Hay'adaha Xukuumadda, Xarumaha Tacliinta Sare iyo daneeyayaasha kale ee Tacliinta Sare.
- 10) Inuu abuurto jawi wada-shaqayneed oo u dhexeeya Guddida Tacliinta Sare iyo Hay'addaha kale ee Dawlada.



- 11) Inuu hirgaliyo xeer-nidaamiyaasha ay soo saaraan Guddida Tacliinta Sare.
- 12) Inuu diyaariyo qaab-dhismeedka waaxaha iyo qaybaha xafiiska komishanka, isla markaana ka ansixiyo Guddida Tacliinta Sare.
- 13) Inuu diyaariyo war-bixin sanadeed ku saabsan arrimaha Tacliinta Sare ee Dalka.
- 14) Inuu qabto shaqo kasta oo kale oo la xidhiidha hawlaha shaqo ee Guddida Tacliinta Sare si waafaqasan Xeerka Tacliinta Sare.

Qodobka 6aad

Xilka iyo Waajibaadka Guddommiye Ku-xigeenka Guddida

Xilka iyo Waajibaadka Guddommiye Ku-xigenka Tacliinta Sare waxaa ka mid ah;

- 1) Gudashada xilka Guddomiyaha marka uu guddomiyuhu maqan yahay ama ay bannaanaato jagada Guddomiyaha Guddidu.
- 2) Wuxuu ka caawinayaa Guddomiyaha gudashada hawlaha shaqo ee guddida Tacliinta Sare.
- 3) Gudashada Waajibaadka kale ee Guddomiyahu u igmado.

Qodobka 7aad

Xilka iyo Waajibaadka Agaasimaha Guud ee Guddida

- 1) Si ay u fududaato xilalka iyo waajibaadyada Hay'adaha xukuummada, sidoo kalana xilalka laysu raaciyo hab la maamuli karo, iyadoo la tixgelinayo sida ay isu qaadan karaan, waxaa halkan lagu soo



wareejiyey xilkii iyo shaqadii Agaasimaha guud ee tacliinta sare ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Sayniska, waxaana lagu wareejiyey Guddida Tacliinta Sare, si waafaqsan Qodobka 18aad ee Xeerka kala Xadaynta Nidaamka Xukuumadda iyo Hay'adaha Madaxa Bannaan, Xeer Lr.71/2015.

- 2) Agaasimaha Guud ee Tacliinta sare ee Wasaaradda Waxbarashada iyo Saynisku waxa uu noqonayaa Agaasimaha Guud ee Guddida Tacliinta Sare, waxaana uu hoos tagayaa Guddoomiyaha Guddida.

Xilka iyo Waajibaadka Agaasimaha Guud waxaa ka mid ah;

1. Maamulka iyo socodsiinta hawl-maalmeedka shaqo ee guddida.
2. Fulinta qorshayaasha iyo barnaamijyada shaqo ee Guddida.
3. Diyaarinta qorshayaasha iyo barnaamijyada tacliinta sare, iyo u gudbinta guddoomiyaha guddida.
4. Hawl gelinta iyo kormeerka hawl-wadeenada iyo shaqaalaha guddida.
5. Daba-galka iyo qiimaynta shaqada, shaqaalaha iyo madaxda waaxyaha, iyada oo la raacayo Xeerka shaqaalaha Dawladda.
6. Maamulka miisaaniyadda guddida, iyadoo la raacayo xeerarka maaliyadda.
7. Diyaarinta miisaaniyadda iyo xisaab xidhka Guddida.
8. La saxeexidda guddoomiyaha qoraallada maaliyadeed ee guddida.
9. Qaadista hadal-qoraalka shirarka Guddida iyo kaydinta go'aamada Guddida.
10. Diyaarinta war-bixinada Guddida.



11. Dhaqan-gelinta awaamiirta iyo go'aamada Guddida ka soo baxa.
12. Qabashada shaqooyinka kale ee xusan Qodobka 25aad ee Xeer Lr. 71/2015. Iyo xeerka iyo siyaasadaha Tacliinta Sare ee qaranka.

Qodobka 8aad

Shirarka Guddida Tacliinta Sare

- 1) Guddida Tacliinta Sare wuxuu yeelanaya shirar caadi ah iyo shirar aan caadi ahayn.
- 2) Shirarka Guddida waxaa guddoominaya guddoomiyaha, haddii uu maqan yahayna guddoomiye ku-xigeenka.
- 3) Shirarka Guddida Tacliinta Sare waxay ku qabsoomayaan marka ay joogaan ugu yaraan shan xubnood, waxayna go'aamadoodu ku ansaxayaan haldheeri codadka xubnaha jooga.
- 4) Agaasimaha Guud oo ah Xoghayaha Guddida wuxuu shirka ka dhiiban karaa ra'yi iyo talo balse kuma laha cod.

Qodobka 9aad

Guddi-Hoosaadyada Guddida Tacliinta Sare

Guddida Tacliinta Sare waxay yeelan karaan guddi - hoosaadyo ay ka mid yihiin;

Guuddi-hoosaadka Kormeerka, Guddi-hoosaadka Siyaasadaha Tacliinta Sare, Guddi-hoosaadka Hubinta Tayada Tacliinta Sare (quality Assurance sub-committee for Higher Education), iyo Guddi-hoosaadyada kale ee ay u arkaan lagama-maarmaan xil-gudashooda.



Qodobka 10aad

Qaybaha Xarumaha Waxbarashada Tacliinta Sare

- 1) Qaybaha Xarumaha Waxbarashada Tacliinta Sare waxay u qaybsamayaan;
 - a) Jaamacado (Universities)
 - b) Kuliyado (Colleges)
 - c) Mac'xado (Institutes)
- 2) Xarumaha lagu bixinayo Tacliinta Sare waxay Noqon Karaan kuwa Dawladeed ama kuwo gaarloo leeyahay oo kala ah;
 - a) Xarumaha Tacliinta Sare e Dawladdu leedahay (Public Higher Education Institutions)
 - b) Xarumaha Tacliinta Sare ee Gaarka loo leeyahay (Private Higher Education Institutions)
 - c) Xarumaha Tacliinta Sare e laga soo dhambalay Jaamacado ay Wadama kale leeyihiin (Foreign Higher Education Institution Branch Campuses)

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Soomaaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-630/022021

Taar: 02/02/2021

Wareegto Madaxweyne

Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda
Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Tix-geliyey: Muhiimadda Xilka
Guddoomiye Ku-xigeenka
Gobolka Buuhoodle;

Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo
Waaya-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo
Masuuliyadda ka Dhalanaysa
Xilkan;

Markaan Sameeyey: La-tashi;

Waxaan Go'aamiyey;

In Mudane, Axmed Cabbaase Xaaji Muuse, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Guddoomiye Ku-xigeenka Gobolka Buuhoodle ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland



Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XM/249-631/022021

Taar: 03/02/2021

Keer Madaxweyne Lr. 12/022021

Cayimaadda Muddada Doorashada

Markaan Arkay: Qodobka 42aad, Faqraddiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markaan Arkay: Qodobka 6aad ee Xeerka Guud ee Doorashooyinka iyo Diiwaan-gelinta Cod-bixiyayaasha, Xeer Lr. 91/2020;

Markaan Arkay: Qoraalka Komishanka Doorashooyinka Qaranka ee summaddiisu tahay KDQ/XK/002/2021, Kuna taariikhaysan 16/01/2021, ujeeddadiisuna tahay Cayimaadda Doorashadda Golayaasha Wakiillada iyo Deegaanka ee 2021;

Markaan Arkay: Go'aanka Golaha Guurtida ee summaddiisa tahay Ref: GG/JSL/KC/G-01/02/2021, Kuna taariikhaysan 02/02/2021, ujeeddadiisuna tahay Go'aanka Dib-u-eegista Muddo Xileedka Golaha



Wakillada Jamhuuriyadda
Somaliland;

Waxaan Go'aamiyey;

In Doorashooyinka isku-sidkan ee Golayaasha Wakiiladda iyo Deegaanka ay ka dhacaan Dalka Jamhuuriyadda Somaliland Maalinta Isniinta ah eek u began 31^{ka} Bisha May 2021.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-634/032021

Taar: 03/03/2021

Wareegto Madaxweyne

Magacaabid

Markaan Arkay: Dastuurka Jamhuuriyadda
Somaliland, Qodobka 90aad
Faqraddiisa 13aad;

Markaan Tix-geliyey: Dastuurka Jamhuuriyadda
Somaliland, Qodobka 60aad,
Faqraddiisa 2aad, Xubintiisa
(b);



Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo
Waaya-aragnimadiisa;

Markaan Arkay: Jagada Xubin Sharafeedka
Golaha Guurtida ee uu
banneeyey Marxuum Aw
Daahir Xaaji Xasan;

Waxaan Go'aamiyey;

In Mudane, Cabdinaasir Aw Daahir Xaaji Xasan, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Xubin sharafeed ka tirsan Golaha Guurtida Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/XKQ/222/1-642/032021

Taar: 31/03/2021

Ku: Cabdi Maxamed Rodol

Maareyaha Guud ee hore ee Hay'adda Duulista
iyo Madaarada

Og: Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka iyo Horumarinta
Jidadka



Ujeedo: Xil Ka-qaadis

Sida aad la socoto, xilka Qaranka ayey dabcigiisa tahay in uu meerto noqdo, oo hadaba loo igmado ciddii hanan karta. Sidaa darted, waxaan gartay in laga bilaabo taariikhda maanta aan kaa qaado xilkii aad haysay.

Waxaan kaaga mahad-celinayaa muddadii aad haysay xilka Qaranka.

Allaa Mahad Leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

Xafiiska Madaxweynaha

Sum: JSL/XM/WM/222-643/032021

Taar: 31/03/2020

Wareegto Madaxweyne

Magacaabid

Markaan Arkay:

Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland, Qodobka 90aad;

Markaan Tix-geliyay:

Ahmiyadda ay Hay'adda Duulista iyo Madaaradu u leedahay Dhismaha Qaranka;



Markaan Arkay: Aqoontiisa, Kartidiisa iyo
Waaya-aragnimadiisa;

Markaan ku Qancay: In uu Hanan Karo
Masuuliyadda ka Dhalanaysa
Xilkan;

Waxaan Go'aamiyey;

In Mudane, Cumar-sayid Cabdillaahi Aadan Qalinle laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Maareeyaha Guud ee Hay'adda Duulista iyo Madaarada Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad leh

Muuse Biixi Cabdi

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland